

# ECEAP: Kaliya maaha uun kulankale oo Zoom ah

The Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) Early Childhood and Assistance Program (ECEAP) ayaa waxay u adeegayeen qoysaska degan Gobolka Washington iyagoo ka saacidayay dhinacyada (waxbarashada, horumarinta caafimaadka iyo taageerada arimaha qoyska) iyo adeegyada ka horeeya dugsiga ilaa iyo sanadkii 1985.

Intii lagu guda jiray Gov. Inslee's "Joog gurigaaga, oo caafimaad qab ah" amarka, adeegyada ECEAP ee qoysaska iyo caruurta way sii soconayaan. Tani ma qaadan doonto hadbkii hore ee ahaa in si goobo ah loo fadhiisto fasalka dhexdiisa, shaqaalaha gudaha ee ECEAP waxay siinayaan taageero muhiim ah qoysaska la tacaalaya inta lagu gudo jiro xanuunkan. Bixiyaasha adeega ECEAP waxay si qoto dheer ula xidhiidhaan bulshadooda waxaanay ka jawaabaan baahiyo kala gedisan oo ah baahiyaha qoyska. Waxay sameeyaan in taageero siiyaan qoysaska iyo bulshada iyadoo ay la socoto dareen wanaagsan iyo khibrad ay u leeyihiin.

## Adeegyada Taageero ee Qoyska

Xataa shuruudaha kala fogaanshaha bulshada ee wakhti xaadirkan, ECEAP qoysaska bilaabay adeegyada dugsiga ka hor ee sanad dugsiyeedka 2020-2021 waxay helayan agabka, caawimada iyo hagida qofka doonaya dalab dhegta dhagaysiga iyo caawimo inta lagu gudo jiro wakhti xaadirkan. Waxaan sidaa u samaynaynaa in aan qabano hogaanka qoyska, in aan siino caawimo iyo xalin dhibaato kasta si wada jir ah oo ay qaybka ka yihiin qoysaskuna kuwaas oo u baahan isku xidhkan iyo caawimadan. Adeegyadan waxa loogu tala galay in lagu taageero qoysaska si loo yareeyo wel welka iyo isdhexgalka dadka kale.

### Tusaalayan caawimaadaha la siiyo qoysaska:

- Caawimo dheeraad ah oo ah dhinaca arimaha bulshada iyo daryeelka wanaagsan ee ubadka iyo qoyska
- Agab telefoon iyo internet ba
- Shaqaalaysiin deg deg ah iyo khayraadka shaqo la'aanta
- Mashaariicda deg deg ah ee cuntooyinka Dugsiga
- In la siiyo hab nidaam lagu kordhinayo deganaansha qoyska
- Caawimada waa loogu talagalay shaqsi kasta oo ka mid ah qoyska
- Barashada xirfadaha maamul ee dabeecadaha (loo isticmaalo fasalka dhexdiisa) in waalidku ay ku isticmaalaan guriga
- Waxay siinaysaa agab, caawimo iyo macluumaad qoysaska u baahan in ay caruurtooda ku ilaaliyaan horumarka akhriska
- Tilmaamaha ku saabsan iyo macluumaadka cashuur dhaafka Coronavirus iyo saamaynta dhaqaale bixinta
- Isku xidhka shabakada qoysaska ee heer gude iyo heer qaranba



### Waalidku maxay ka dhaheen

"ECEAP Aad ayay u wacantahay. Waad ku mahadsantahay jeclaanshaha inankayga oo aanad ku qasbin sida dhibaataada haysata ubadka kale ee badan. Waxaan kuu sheegi karaa in aad si dhab ah u jeceshahay, waxaan u arkaa in uu isbadal sameeyay dhinaca dabeecada ah. Sidoo kale waad ku mahadsantahay daryeelka aad isiiseen iyo sida aad iigu dhiiri galiseen baahiyahayga."

"Aad baan ugu faraxsanahay xadiga taageero ee aad isiiisen mudadaas intii lagu guda jiray. Inkasta oo aanu wali wiilkaygu helin derajada dugsiga, tanina waa qayb ka mid ah noloshiisa anigu aad baan ugu faraxsanahay meesha uu hada joogo. Markale, aad baad u mahadsantihiin maxaa yeelay tani kaliya ayaa guul ah."

### Waan ognahay in xanuunka COVID-19 uu yahay wax sii joogayn ilaa mudo.

Ilaa iyo inta ay caruurta dib ugu noqonayaan fasaladoodii wakhti dhamaystiran, adeegyada qoysaska ee ay bixiso ECEAP waxay ka caawin doontaa isku xidhka iyo in qoysasku si deg deg ah u gaadhaan deganaansho. Qoysaska maanta bilaabay waxay xaqiijinayaan booskooda markay carruurta shaqsi ahaan aadaan dugsiga waxayna helaan taageerada qoyska ee aadka loogu baahan yahay illaa waqtigaas.

Hadaad ku rabto nuqulada dukumiintigan qaab ama luqad kale, fadlan la xiriir Xiriirada Degmada ee DCYF (1-800-723-4831 | 360-902-8060, [ConstRelations@dcyf.wa.gov](mailto:ConstRelations@dcyf.wa.gov)).

DCYF PUBLICATION EL\_0022 SM (09-2020) Somali



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**